

Nadiifinta

Ilaha ka Imaanayaan Sunta Rasaasta ee Guriga



1 Dhaqidda caadiga ah TALLAABADA

Badanaaba waxa aad kaga dhaqdaa gacmaha ilmahaaga iyo wejigaba saabuun iyo biyo. Waxa aad hubisaa gacmaha iyo wejiga ilmahaaga in ay yihiin nadiif inta ay wax cunin iyo inta ay sariirta aadin ka hor.

Badanaaba waxa aad hubisa alaabada caruurta ay ku cayaaraan, qarshadaha iyo mujuruca caruurta lagu sasabo in aad ku dhaqidid saabuun iyo biyo. Ha ku daynin ilmahaaga in ay ku cayaaraan alaabta caruurta ay ku cayaaraan oo ku dhacday dhulka ilaa aad kaga nadiifisid saabuun iyo biyo.

Ha u daynin ilmahaaga in uu cuno cunno kasta oo dhulka ku dhacday.



2 Ku Nadiifin Faakuum Khaas ah TALLAABADA

Waxa aad isticmaali kartaa faakuum khaas ah oo lagu magacaabo Hawo Miirid Khaasa oo wax-qabad fiican oo heer sare leh oo lagu nadiifiyo sunta rasaasta (High Efficiency particulate air Filter – HEPA) waxa aad u isticmaasha faakuumka si aad ugu qaadid sunta rasaasta. Faakuumka HEPA wuxuu leeyahay qashar saare khaas ah kaa soo qaadi kara celina kara gabalada sunta rasaasta. Waxa aad ka wacdaa Waaxda caafimaadka Minnesota taleefoonka 651-201-4610 si aad u heshid liiska ku qoran meelaha laga helayo faakuumada noocyada HEPA.

Waxaa ikhtiyaar kale ah in aad u isticmaashid faakuum qoyan/qalalan meelaha qoyan si aad ugu nadiifisid dhaqid ama biyo raacin. Marka aad isticmaalaysid faakuumka qoyaanka/qalalan, waxa aad hubisaa in biyo ay ku jiraan salka hoose ee qasaca faakuumka qiyaasta cabirka laba inshi (halbeega lagu cabiro dhererka). Biyaha meesha ku jira wuxuu kaa kaalmayn doonaa in uu celiyo busta sunta rasaasta. Faakuumka qoyan/qalalan keliya u isticmaal dhaqidda ama biyo raacinta, marka aad ka nadiifinaysid sunta rasaasta. Biyo la'aan ha ku isticmaalin faakuumka qoyan/qalalan in aad ku ururisid busta qalalan, ama gabalada renjiga ee sunta rasaasta.

Weligaa ha u isticmaalin faakuumka nadiifinta gurigaaga in aad ku nadiifisid busta renjiga ama gabalada reniga ka soo foqaayo derbiyada, sagxadda dhulka ama xakabadda daaqada iyo derbiyada. Faakuumka guriga wuxuu ku haboon yahay shaqooyinka nadiifinta caadiga ah, marka laga nadiifiyo sunta rasaasta. Laakiin marka faakuumka lagu nadiifiyo sunta rasaasta, qashir reebaha faakuumka nadiifinta gurigaaga ma soo qaadi karo mana celin karo gabalada yar yar ee sunta rasaasta – busta sunta rasaasta waxay ku afuufi kartaa hawada meesha dadka ay ku neefsadaan

3 Ku Dhaqidda Qoyaanka

TALLAABADA

Ku dhaqidda qoyaanka waxa weye habka ugu wanaagsan ee lagu nadiifiyo busta sunta rasaasta. Wax qoyaanka ah ku dhaq xakabadaha daaqada, godadka, derbiyada, saxxada dhulka iyo meegaarka albaabada badanaaba kaga nadiifi busta sunta rasaasta.



Tallaabada Koowaad

Waxa aad isticmaashaa laba baaldi – hal baaldi waxa aad ku nadiifisaa waxa isku milan, iyo halna waxa aad ku nadiifisa biyo raacinta. Si cad u calaamadee baaldi kasta. Iska hubi in aad gashan tahay qalabka biyaha aan soo gudbinaynin, waxa kiimikada u adkeesta, gacan-gashi ka samaysan caag marka aad wax qoyaanka ku dhaqaysid. Waxa aad ka gogaysaa caruureta alaabada waxa lagu nadiifiyo iyo dhamaan saabuunada waxa lagu dhaqo.



Tallaabada Labaad

Waxa aad hal qaado oo saabuunta foosfaatka sida Trisodium Phosphate (TSP) ku darta hal galaan oo biya ah si aad u samaysid saabuunta nadiifinta, ama si toos ah saabuunta suxuunta lagu nadiifiyo oo ku jirta macdanta foosfaat-ka, iyo hal galaan oo biyo ah. Haddii aadan heli kareyn nadiifiyaha foosfaat-ka, yaana kaa joojinin ku dhaqidda qoyaanka. Isticmaal saabuunta loogu tala-galay nadiifinta guriga waxaadna ugu qastaa sida ku qoran jihatya qasaca saabuunta.



Tallaabada Saddexaad

Ka ururi gabal kasta oo renji soo dhaca iyo jajabka kale ee ka haray bur burka kaa soo laga heli karo godadka, xakabada daaqada, albaabka, iyo saxxada dhulka. Gabalada renjiga iyo jajabka waxa ka soo hara bur-burka ku rid bac adag oo laba-jibaaran ee qashinka lagu ururiyo. Bacda afka ka xir.



Tallaabada Afaraad

Ku dhaq godadka iyo xakabada daaqda, meegaarada albaabka, derbiyada iyo saxxada saabuun milanta ee loogu tala-galay nadiifinta. Waxa aad isticmaasha laba qeyb oo kala gaar ah oo calalada la tuuray ama xaashida lagu tir-tirto hal qeyb u isticmaal dhaqidda hal meelna u isticmaal biyo raacida.



Tallaabada Shanaad

Biyo nadiif raaci meesha aad ku dhaqday saabuunta nadiifinta, waxa aad isticmaasha calalka la tuuray ama warqadda tir-tirka ee kala duwan. Waxaa muhiim ah in aad u isticmaashid calal ama warqadda tir-tirka kala duwan tallaabooyinka nadiifinta iyo biyo raacida.



Tallaabada Lixaad

Ku rid dhamaan calalka, warqadaha lagu tir-tirto iyo gabalada renjiga bacda adag oo laba-jibaaran aadna u sii adag. Bacda si adag u xir. Bacda ka fogeey meel caruurta iyo xaywaanka guri-jooga ay gaari karaan. Waxaaad wacdaa xafiisyada degmadaada si aad u ogaatid habka aad iskaga tuuri kartid waxa ka hara bur-burka sunta rasaasta ee dhanka ururinta qashinka khatarta ee guriga, iyo meesha sunta rasaasta la ururiyey la geynayo, ama waxa aad dhigtaa meesha qashinka guriga laga qaadayo.



Si aad u codsatid alaabadaan oo ku qoran qaab kale waxa aad kala xiriirtaa:
Minnesota Department of Health Lead Program
P. O. Box 64975, St. Paul, Minnesota 55164-0975
Taleefoon: 651-201-4610. MDH TTY: 651-201-5797
Adeegyada war-gudbinta Minnesota TTY: 1-800-627-3529
Waxa kaloo aad booqataa Websaayitkayna www.health.state.mn.us
Waxaa lagu daabacay warqado dib loo isticmaalayo 1/2006 Lambarka IC 141-1351
Caruurta ku sawiran warqaddan dhabta ah ma ahan kuwo ku sumoobay sunta rasaasta. Wax soo saarka iyo tasmada summadda waxa weye keliya tusaalooyin mana ka samaysna caddeyn ama hadalo daahsoon oo laga ayiday Waaxda Caafimaadka Minnesota.

Su'aalo?
Ka wac Waaxda
Caafimaadka
Minnesota
651-201-4610